# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 35aad fadhigii 16aad**

**25/12/2017**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Guddoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajendaha: Dhegaysiga** Warbixinta Hanti dhawraha Guud ee xisaab xidhka 2016.

**Gudoomiyaha**: - Mudanayaal waxa jooga hanti-dhawrihii guud oo ka waramaya xisaab xidhkii 2016, way nagii dood ka galnay, Waxa dal bateen in loo yeedho hantidhawraha guud isu uu uga warbixiyo xisaab xidhkii 2016, warbixinta markuu sameeyo kadibna waxay waydiin karaan xildhibaanadu wixii su'aalo ah ee ay qabaan waaanad waydiin kartaan, markaa waxaan ku soo dhawaynaynaa hanti dhawraha guud si uu uga warbixiyo xisaab xidhkii 2016.

**Hanti dhawraha guud:** Bismialha, Mudane gudoomiye iyo Xildhibaanada Golaha Wakiilada marka koobaad aad baan idiin salaamayaa, dhamaantiin waxa maanta farxad wayn ii ah oo ay tariikhdu tahay 25\12\2017 oo mudanayaasha sharafta leh ee Golaha Wakiilada aan uga xog waramo warbixinta ku saabsan xisaab xidhkii Misaaniyada dawlada dhexe ee 2016, taaso xafiiska hanti dhawrka guud ee Qaranku uu hore ugu soo gudbiyay Golaha Wakiilada bishii 6aad. anigu maan joogin ama kamaan tirsanayn xafiiska hantidhawrka guud ee qaran, oo aan ku soo biiray 5\8\2017, xisaab xidhkkana wuu iga horeeeyay waxaanan ku sameeyay daraasad, daraasadaan ku sameeyay waxaan eegay meelaha dhinaashuhu ka jiro oo kaliya, iyo sababaha dhinaashaha keenay, xisaab xidhku kuwayshan waa la saari karaa xildhibaanada Golaha Wakiiladu xaqbay u leeyihiin wax alle iyo wixii mad madaw ku jiro inay waydiiyaan hanti-dhawrka guud ee Qaranka, laakiin waxaan ka cudur daaranayaa, ducumentka keena la yidhaahdo maaha document la keeni karaayo, waa documentka Qaranka oo dhan 6d-a Gobol iyo 23 Degmo, waa xisaab xidh u baahan in lagu soo raro gaadiid documentka la doonaayo, dakhliga miisaaniyada dhinaashaha ku yimid oo kaliya Ayaan anigu daraasad ku sameeyay, madaama oo aanan ahayn Xisaabiyihii guud ee xidhay xisaabta.

Anigu waxaan ka warami karaa oo kaliya, hadii aan xilka sii joogo xisaab xidhka 2017. Xisaabiyihii guud ee xidhay iyo ku xigeenkiisiiba iyo la taliyihiiba seddexdii qof ee xidhay midna ma joogo xilkan goobtana ma joogo, waa la is waydiin karaa oo kuwayshan

waa la saari karaa meelaha qaar ee mad madaw galay. Meelaha mad madawgu galaa waxay u baahan yihiin, in dib u noqosho iyo in la soo baadho oo dib loogu noqdo, lama odhan karo buugoo dhan ayuu mad madaw ku jiraa, laakiin meelaha qaar ayaa u baahan in tafaasir (clarification) ama cadayn dibaa loogu noqon karaa, anigu waxaan ka eegay oo kaliya, sida buuga ku qoran xisaab xidhka pageska, 10, 8,6,7 hedhadhka 11350, 11441,11442,11455,14130,14160,11445,11650,14208,14150, oo aan ahayn hedhadhkaa oo kaliya, lakiin buuga waad wada haysataan dhinaashaha dakhliga miisaaniyadu meelaha uu ka yimid waa meelaha ugu buur buuran weeyi dhinaashahaa oo ku dhawaw 300,000,000,000 markaa anigu meelaha wax aan ka eegay heedhadhna way jiraan uu korar ku yimid, oo kordhay marka inta aan darasad ku sameeyay waa intaa, oo aan hoos u eegay dhinaashaha iyo meelaha ay kaa yimaadeen, wixii intaa ka baxsan hedhadhka kuweeriga sarteen ama madmadw ku jiro, ama suaalaha golaha walkiiladu ka qabo oo uu xaq u leeyahay in uu waydiiyo cadaymaha, meelaha ay ka yimaadeen. ama uu madaw madaw ku jiro ee u baahan, tafaasiisha iyo cadaynmaha taana idinka ayaa soo gudbin doona, hadii uu illahay idmo waxayna u baahna tahay dib u noqosho iyo xisaab xidhka, oo dib loogu noqdo on documentkii dib loo furo, foojaradii iyo waranadii dib loofuro, wixii suaal laga qabo kuweeri saran yahay, mudanyaal xafiiska hantidhawrka qaranku, wuxuuu u xil saran yahay ilalainta hantida qaranka ,oo ay ka mid tahay, xisaab xidhka hada aan u fadhino, hadii aad dib u eegto xafiiska hanti dhawrku qaranku, waa xafiska dayacan, gadiid male shaqaalaha la doonaayo, in soo xidhaan xisaab xidhka misaniyad,a ama ilaalinta hantida qaranka ee dhamaan Somaliland misharkoodu waa 100$, golaha wakiiladu waxa uu lee yahay, soo jeedin wuxuu lee yahay qiimayn ,masuuliyadina way ka saran tahay, sida ay xisaab xidhka masuuliyadi uga saran tahay ayay masuuliyadi ka saran tahay, mishaarka shaqaalaha iyo xuquuqda shaqaalaha ,waxan manta soo jedinayaa masuuliyiinta ku yimaado degreetada madaxwaynaha, waa shaqaale ku meel gadha waxan idiin soo jeedinayaa, shaqaalah joogtada ah ee xafiiska hanti dhawrka qaranka, in mishear kooda xuquuqdooda iyo gadiidkooda meel la saaro, waajibayna idinku tahay anigu waan ka baxay halksaan ku joojay.

Waa ka hadlay xisaab xidhkii miyay jirtaa cid suaal waydiinaysaa

1. **Md. Maxamuud Jaamac Warfaa:** Golaha waan salaamayaa, hanti dhawraha waan

salaamaya, hanti-dhawre guud, 2016 waxa jiray hay'adaha dawlada Wasaradaha in laga gooyay 25% kharashkoodii, in la jaray wuxuu ka soo bilaabmayay April ilaa December, January February ilaa March si caadiya ayay u qateen, lakiin Aprill ilaa December, kharashyadii oo dhan waa laga joojiyay, kharshkaa laga gooyay waxa uu gadhayay 42,000,000,000slsh, kharashka ma inoogu jiraa khasnada dawlada oo ma hubiseen?

Waxa naga sii diiwaan hantida dawlada oo aad miisaniyadii 2015, 2016 oo ku jirtay kharshkasi ma ku baxay hantidii qaranka ee alaabta wixii la soo siiyay ma hubiseen oo ma tahay lacagtaasi lacag baxday oo si sharci ah u baxday oo hawshaa lagu qabtay?

waxa jiray lacagaw la soo daabacay 2011 ilaa 2016, lacagayaw badan baa la soo daabacay oo baanka dhexe loo soo daabacay, lacagahaas ma ku jiraan khasnada dawlada oo ma hubiseen, inay ku jiraan khasnada laftideeda?

wali lama hayo qof u xidhan xatooyo xoole dadwayne maxay ku dhacay day?

ma daaxdax baa wadanku maba laha, arinta aan soo jeedi nayaa wax weeyi, gudoomiye in hantidaa qaranka ee aan ognahay sida ay maqan tahay iyo sida loo lun saday in gudi loo saaro oo la baadho oo si qoto dheer loo baadho oo loo hubiyo

**Hantidhawraha guud:** inay ku jirto tashiilkaa dakhliga miisaaniyada 2016, tashiilkaa waxan u baahanahay inaan dib u eegno, madaama oo uuna buuga ka muuqan, markaa taa imika kama jawaabaayo, iibka hantida ma guurtada ah, headhadhka aan imika inii sheegayay ee hoos u dhacu ku yimid, Matalan cashuuraha guryaha macash macaashta, guryaha sub hedhadhka aan idin sheegayay, dakhliga kalida hantida dawlada ku tal galku waxa uu ahaa, miisaniyadad ansixiseen 2016 36billion, dhakhliga dhabta ah ee soo baxay sida buuga ku qoran waad wada aragteen 10billion, hoos u dhaca meelaha uu ka yimid bay ka mid tahay 25,900,250, taa hoos u dhaca way ka muuqataa oo buuga waad ka aragtaan, dakhligaasi inuu miisaaniyada ku jira way ka muuqataa, oo buuga waa ku jiraa, oo xisaab xidhkana waa iga horeeyay . cidloo xidhaw xoolo dadwayne, anigu afar bilod baan jogay xafiiska hanti dhawka qaranka, 4bilood ee aan joogay xafiiska hanti dhawrka qaranka, wuxuu ahaa dhamaadkiisanadkan markaa tirikoobka hantida dawlada, tirikoobka gadiidka dawlada, wixii aan lahayn sumada gadiidka dawlada, intaas say 4bilood ku dhamaaty, markaa taana anaagu cid umaanan xidhin, cidna u mana ee dayn, shaqadu lakiin way socotay.

2. **Md. Maxamuud Jaamac Cilmi:** shirgudoonkiyo, iyo Goluhuba iyo martiduba waa ay salaamayihiin, horta intaa su'aasha hore ku waydiin, anigu mabsuud waxaan ku ahay, ninka aan wajigiisa arkayo, hadii uu suuqa iga ga soo hor baxo aan gartee, anigu mabsuud waxan ku ahay oo arin wanaagsana, go'aankaa aad soo saartay, intaanan kan u galin ee ah in dib loo wada baadho wax alaale wixii umada ama hanti ha ahaato, ama liisano ha ahaato, ama dakhli ha ahaato, go'aankasi waa go'aan wanaagsan, waana ku tageerayaa shaqsiyan, waayo wax aynu raadinaynaa imika waa waxa maqan, ee Golahana lagaa waydiinayo, hantidaasa taa anaguna danbi baa nuku leenahayoo, waxa weeyi,basas baa nu bixinay, heshiisyaa nu bixinay, dekedaan nu bixinay, oo aan budgetkii iyo miisaaniyadii ay soo galaysay aan la na tusin, oo nan arag. Go, aanadii haamihii oo aan nu diidnayna adaa sheegay, ta kale 4jeer baa bangigu lacag soo daabacay, lacagtaa la soo daabacay kuma taala xisaab xidhka, iyo wixii maalgalin ahayd ee la galiyay, midna kuma taalo. waad ku cusub tahay meeshii, lagumana ansixin wali, su'aashu waxay tahay, lacagtaa la soo daabacay ee aan Golaha la soo marin, ma kuugu jirtaa wax yaabahaad tidhi hala qabto, ee ay ka mid tahay, haamaha, taarikada baabuurta, raashinada ciidamada, Airportka waxeedii, su'aashaa weeyi mida aan ku waydiinaayi.?

**Hantidhawraha guud:-** Horta sida ka muuqata buuga miisaniyada, oo aad gacanta ku wada haysaan, kuma jirto lacago la soo daabacay sanad 2016, laakiin waxa jira lacago la soo daabacay oo ka muuqata 2014 iyo 2015, lacagahan la soo daabacay, een dakhligaana ku darteen, si aad ugu darteenba, waana ka muuqataa 2015kii iyo 2014kii ba, lacagaha la soo daacay wax iska leh Bangiga oo kaydka ah, Bangiga oo ma garanaysid siday dakhliga u gashay, taasi wax commetka kama hayo, oo waa wax iga horeeyay, 2016kii maaha oo way idiin soo martay 2014 iyo 2015kii ba, labaduba way idin soo mareen, markaa su'aalaha waxay ahayd inaad waydiisaan cidii iga horaysay, ee halkan fadhiday ayay ahayd inaad waydiisaan, markaa kuwaa madaama oo ayna ku jirin, 2016ka aan ka hadlayno kama jawaabi karanayno.

**3. Md. Cabdiraxmaan Muuse Jaamac:** Bismilaha, shirgudoonka, Baarlamaanka, iyo hantidhawrka, xoghaynta, waan wada salaamayaa, anigu su'aal waydiin maayo, laakiin sida muuqata dee, waxa weeyi gudoomiyaha hanti-dhawrka ee hadda inala joogaa, waxa aan waydiinaynaa way ka wada horeeyeen, markaa waxaan filayaa in waxaa buuga ku yaala, ee inaga la inoo keenay, ciddi ama masuuliyiintii ka horeeyay maynana waydiin, inagaa hawsheenii gabnay, in bal wixii buugaa ka danbeeya, aan inagu dib iskugu noqono, oo hadeer su'aal la waydiiyaa inooguma muuqato, sidaa iyo nabad galyo.

**4. Md. Jaamc Xaasan Aaden:** Bismilaha, su'aalahan toos ayaan ugalayaa, horta marka hore waxaynu wax waydiinaynaa ee aynu u yeedhnay waa xafiiska hantidhawrka guud ee Qaranka, shakhsi cusub maahee, ragbaa la socda hadii gudoomiyihii la badalay, waxa jooga ragii ka hoseeyay, ee xisaabta hayey waana raga garab fadhiya ee la socda, bal horta xisaabtu ama su'alauhu yaana inaga noqon shakhsi, waxaynu waydiinaya hanti Qaran. Maalintii dhawayd waxaanu nidhi hanti dhawrihii, hore ha loo yeedho wax la yidhi, isagu shaqo hada ma hayo ee waa nin suuqa iska jooga, anigu waxaan qabaa xaqiiqdoo dhan waa ninka sheegi karaa, waa nin madax banana, oo aan shaqo haynin, oo aan la eryi karaynin, kaa waa la iga xogbatoo, waxa la yidhi qolada cusub haloo yeedho. waxana la socda qoladii ku xigtay ee xisaabta haysay, ee ka hoosaysay hantidhawrihii hore, markaa anigoo xafiiska wax waydiinaayo, oo aan hantidhawraha cusub kaligii waxba aan waydiinayn, ee xafiiskoo dhan wax waydiinaayo, waxan ku noqonayaa. su,aal la waydiiyoo hore, lacagahaa la soo daacay halkay galeen, iyo juwanaday ku baxeen, iyo tiradoodu waxay ahayd, waan waydiinaya? Madaama ay iyagu ka wakiil yihiin, waa nin xafiiskii oo dhan ka wakiilaba, waana nin hantida qaranka na ka wakiilyihiin, ama hantidhawr ka yihiin.

waxan kaloo waydiinayaa, dee hantidu waxa ay ku baxdaa, juwano iyo cadaymo, la gooyo oo xafiiska xeer ilaalinta guud soo marta, oo system leh, oo aan nugaranayno, waayo afxisaabeedka iygaa inaga yaqaano, halkaana inay soo wada mareen baa la doonayaa, inkastaw shaqqale yihiin, oo ayna madax banaanayn, hadana waxa fiican inuu runta ku dhintaa, marka wax la waydiiyo, dee waxa la baadhayaa waa hantidii umadee,

inay cadeeyaan baan uga baahanahay, dhamaantood waxa kale oo an waydiinayaa lacagtaa la soo dacay, sanadahaa in la helo cadaynteedii, siday ku baxay, iyo tiradeedii, iyo juwanadeedii, iyo waxan waydiinaya xafiiska oo dhan, raga ka hoseeyaan leehay hawshan haka jawaban. madaama ay iyagu u joogeen, imikana isagaa Meesha fadhiya, waa inuu soo xogwaraystaa, arimaha, qaarna waxa uu ku celiyay in dib loo baadho, iyo waxa ay ubahan yihiin?

**Hantidhawraha Guud:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Marka hore waxaan salaamayaa, dhammaan Mudanayasha Golaha Wakiilada, mar labaadka haddii aan dib ugu noqdo su'aalaha, inta badan ka imanaaya mudanayasha anigoo ahaa, madaxii ama Agaasinkii waaxda, ee hawshan inteeda badan qabtay, haddii aan xaqaa'iqa ka hadalno, oo aan si runa u wada hadalno, xisaab xidhka miisaaniyada 2016, waxa uu asalkiisa hore ka yimid odoroska Miisaaniyadda, ama ku talagal Golaha laftarkiisu ansixiyay, lacagayawga ka muuqda miisaaniyada 2016, ee ah lacagta la soo daabacay, dhab markaan u hadlo, waxa weeyaan lacagta asalkeeda in central bank, uu yeesho nasiib daro waxa dhacay, dhib badan, in mudooyinkii danbe in wasaarada maaliyadu iyo gaar u yeelato, lacagtaa tasoo u baahan, in daarasad laga sameeyo, aqoonyahano u tagaan, si loogu celiyo lacagta masuuliyadeedii central bank, waxa xaqaa'iqa in lacagtii ku jirtay miisaaniyada 2016, ee odoroska Goluhu ansixiyay, aan haba yaratee, wax ka baxay aanu jirin, oo wax kharasha ama lacag lagu soo daacay anay jirin, hadaan dib ugu noqdo su'aalihii kale ee xildhibaanada, ka imanayay madaama oo aan ahaa qof inta badan xog ogaal u ahaa hawshan. Lacagta 2015 iyo 2014 labadaba waxa lagu soo daabacay lacag dhan 45million, lacagtaasina waxa ay toos u gashay qasnada dawlada, ma jirin wax dhinac maray, hadii dhinac kale aan ka eegno kharashaadka Goluhu ansixiyeen, ee odoraskii miisaaniyadii hore, kumay jirin markeedii hore wax kaliya, ee ku jiray in lacag la soo daabaco, kumayse jirin wax Goluhu u ansixiyay, in waxa hawshaa lagu qabto, ama nidaam nuucaasa lagu qabto, lacagta iman doonta inlaga heli doono dhammaan, lacagtaas oo ay ahayd in laga fikiro asalkii hore. Lacagta la soo daabacaaya ma faa'iidaa ku jirto hadii uu dulsaar ku jiro lacagtas, maxaa loogu talagalay in lagu qaban doono, waa su'aalo u yaalay markuu Goluhu ansixinayay, sidaan jecelahay miisaaniyada. Haddii aan dib ugu noqdo su'aal uu Xildhibaan Maxamuud na waydiinayay, iyadana oo ahayd wax ma qabateen, ama maxa dambiye ee ka soo baxay, sida uu dhigaayo, qodobka 32 ee, xeer number76 Xeerka Hnati dhawrka Qaranka, oo faafintiisu rasmiga ah, la faafiyay 2017, Goluhuna ansixiyay, faafina lagu smeeyay wakhtigaas qodobka 32 wax uu dhigaya, wax yaaba ha xatooyada ah, ee ka soo baxa miisaaniyad, hadda idin hortaala waxa weeyi qaabkee loo maray xisaab xidhkii, laakiin wixii ka soo baxay waxa ay tagi doonan haay'adaha sharciga, hadii allaha awooda lihi ogolaado waad mahadsan tihiin .

**5. Md. Saed Warsame Ismaaciil:** Bismilah, waxa jirtay in miisaaniyadii 2017, ay ka mid ahayd lacag ka soo wareegtay surplus ah 6 million oo dollar ayaa ku jirtay miisaaniyadii 2017, xisaab xidhka 2016ka, waxa ka muuqda dhinaasho, labadasi isma qabtaan, waxan

kale oo xagan karabaa, inan eegno marka laga hadlayo hantidhawrista, hantidhawrku lacag uun ma eego. wuxuu egaa systemka, kana warbixiyaa qaabka loogu dhaqmay, haday iib noqoto, haday noqoto qabka isticmaalka, midna kama muuqdo rebotkan, warbixintu wax moodaa in la eegay, uun lacagtii qorshaysnayd, uun iyo lacagta la isticmaalay ayuun baad moodaa, in la is bar bar dhigay, lakiin warbixinta waxay ahayd inuu wax badan sheegto, marka laga hadlayo isla xisaabtan, iyo daahfurnaata, qaabka iibka, qaabka kharashku u dhaco. in waxa soo dhan ay sheegtay ahayd,.

Waxa tidhi lama samayn karo document, lasoo attachment gareeyo, dee taasi noqon mayso. Xisaab xidhku mar hadaanay attachment documntba lahayn, oo lagu isticmaalay uma ekaanayso xisaab xidh, waxba kama duwana anago intaa meel la fadhiisano intay kharshkiyo iyo isku balance garayno, marka siday taasi noqonaysa waxa xeer ama sharciya. Maydaan isticmaalin marka buugaa rogtabahal qodob oo sharciya ma jirto, oo ad istcmaasheen, oo ka mida kuwa xisaab xidhka, ama miisaaniyada, sheegaayo kuma jirto waxaaso dhan wad ka tagteen?

**Hantidhawraha guud:** Su'aashada koobad, ee dhinaashaha miisaaniyadu meelaha ya ka timiday, waanigii sheegnay iyo sababaha ay ku timid, kuwari hadii la soo saaro hedhedhka, caynkas iyo ku caynkaasa, numbarka sidaa iyo sidaasa, waxan u baahanahay, buugoo dhan in lama soo raacin karo attachment, horaan u sheegnay oo buugu, wuxuu soo samarays gareeyay miisaniyada qaranka oo kooban, markaa buugoon dhan lama soo raacin karo, attachment waayo macnaheegu, waxa weeyi, waxa loo bahan yahay kharsh fara badan, documentka oo dhan baa loo bahan yahay, lakiin hedhadh mucayina, hadii la yidhaahdo waxan uga bahanahay in la soo raaciyo attachment, oo markii la laha golahga kalaya, hadii la odhan lahaa hedhadhkaa ka Ayaan uga baahnahay tafaasir, way la socon lahayeen attachment, waan qayb lahayn, imika lakiin su,aashaasi namay soo gaadhin in la yidhaahdo, hedhadhka nucaasan uga bahanahay support document, buugoo dhan hadii la yidhaahdo support document baa loo bahanay, macnaheedu waxa weeyi, document laga soo samarays gareeyay miisaaniyada qaranka. markaan horan u sheegnoo qodobada u baahan cadaymo, goluhu waa na waydiin karaa, dibaa ugu noqon karnaa waynu eegi karnaa, markasaan jawaab kaafiya ka bixin karnaa, lakiin buugoo dhan lam soo raacin karo attachment, lakiin hedhahdh mucayina hadii aad tilmamo marksa waan soo raacin lahayn , missaaniyada 2016 ayay nu ka hadlaynaa, 2016 sida caadiga ah ama xeerarka xisaabaadku iyo tilmaamaha xisaabka ay tilmaamaan waxa loo raacayaa, in la soo qaato 2015, hadhaageegii sida buuga ka muuqata hadhaagii 2015, waxa inoo soo baxay lacag surplusa, oo saaida xiligaas 2016 xisaab teeda waxa loo sameeya sigaara, sida ku cad boga 2aad ee la yidhaahdo dheeli tirka, khasnada iyo bangiga, ayay ka muuqataa xisaabtii horee, soo wareegay iyo ka sanadkan ka wereegi lahaa.

**6 Md. Maxamed Cali Xirsi:** Guddoomiye, waad salaman tahay adigu iyo hanti-dhawrkuba, iyo xafiiskiisuba, ugu horeen aad iyo aad baan ugu faraxsanahay, inaad xagan timaadaan oo reportkii aad keenteen, aad warbixin ka siisaan, aad iyo aad baan kuugu mahad naqayaa. Guddoomiye waxan halkani yaala markaad hanti dhawre tahay, ama ay tahy xafiiska hantidhawrka aad tahay, waxaad ka masuul tahay golaha iyo qarankaba, aad uga masuul tahay haya'da doontaba uga masuul ahaw, waxad ka masuul tahay 27 Wasaaradood iyo dakhligana adigaa dufaacaaya, hay'adaadu waxay dufaacaysaa dakhligaa iyo kharashaadkaa oo dhan, sida ay u baxaan. Golahana iyagaa ka dufaacaaya anaguna sidoo kale guddi baan nu lee nahay, oo gudidaas waa gudida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Gakiilada, iyadaana nooga wakiila inay dufaacdo hantida, markaad indinku la xidhiidhaan ee aad keentay reportka. reportkaasi ka dib markay baadheen xisaab xidhkaa, golaha aad kenteen maaha dad ini caawinaaya, laba mid bay gudidu samayn kartaa, wayna dufaacdaa oo sidaad dawlada oo dhan u dufaacayso ayay iyadna, adinka kuu dufaacdaa, oo golaha ay iyadu kaaga dufaacdaa, inad adigu hadasha maahee, hntidhawraha iyo shaqadiisa inay halkan ka dufaacan, oo ay wixii saxsan iyo wixii qaldan ba ay iyagu keenaan, ay golaha keeneen dad dufaacaya maaha hantidhawraha guud, iyo xafiiskiisa wax yaabaha ay soo qoreen, waxa ka mida xisaab xidhka 2016, uma qorna si waadixa, oo la fahmi karo, ayay sidoo kale ay soo qoreen qodobada ay ka mid tahay kharashaadka ugu badan, ee ku jira miisaaniyada ee khasnada guud, may amaaanin tafaasiil inkastawna ka bixin. waxbay ka taab taabteen, oo sidii loogu talagaly may bixin bay lee yihiin, kala wareejinta xisaabaka iyadana way taabtaabteen, iyadana gobalada bari bay sheegayaan, oo iyagana halkaa aman kamay soo jeedin lacagta 2% percentga ah ee loo qodeen yay gobalada bari, iyadana waxa noo soo baxaya, in lagu kharash gareeyo, meel kale waxan filaya seddexdaa qodob ayaa ugu muhiimsan.

Waxa ay wax ka taab taabteen, ee ay ka sheegeen oo seddexduba, lidi ku ah xisaab xidhka, Goluhuna taas buu ka doodayaa, oo u jecel yahay in ay ka doodaan, oo ay waxana idinka waydiiyaan, baa horta keentay imaatinka aad halkan timaadeen.

Seddexdaa qodob hadaan ka gudbo. xisaab xidhka mid hadaan ka gudbo aad iyo aadna waan kaaga mahad naqayaa, awooda hanti-dhawraha uu leeyahay, inaad halkan ka sheegtay ceeb maaha, in la yidhaahdo Golaha, wax nala qabta, waxaasaan ku diciif nahee, hanti-dhawraha in badan baa nu wada shaqaynaynay 300,000 ama 400,000 budget koodu weeyi, markaad dhinac ka eegto wax qurux badan weeyi, inay haay'adi cadaysato oo ay tidhaahdo, wax nala qabta, wax ma qaban karnee, laakiin indha la'aan markaad tidhaahdo isku difaac, indha la'aan markaad tidhahado wax ku qari, indha la'aan markaad tidhhdo xildhibaanada halkaa fadhiya jujuub wax halagu mariyo. Farqiga aniga iyo hanti-dhawraha noo dhexeeyay intaas uun bay ahayd, aad iyo aad baan ugu farxsanahay inay qiratay, oo sheegtay baahiyo farabadan oo ay haay'adu leedahay, oo ay baahna tahay inay jirto, buugbaad halkan keenteen.

Sharci miisaaniyada marka na noo keeno, waa buug iyo bac, laakiin waa mala awaal laakin mala awaalkaas, ayaa lagu ciyaarayaa inay waxaasi soo bixi doonaan, laakiin kan cadayn keena baan odhanayna, xeerarka wadanka u yaalaana way cadaynayaan, hanti-dhawruhuna iyo haa'yada hantidhawrkuba waa sifo wal bay, oo ay qaado meel walba oo ay tagto waa inay wax waydiisaa, hayadahaas, iyo wasaaradahaas dhaqaalaha qaranka soo galaya, ta la iniga doonayaa ee ugu muhiim sane, waa cadayn buugan ma ansixin karo aqliga foyaw, ma ansixin karo caqli cafimaad qabaa, ma ansixin karo caqli wax garanayo, ma ansixin karo oo gacanta uma taagi karo, su,aasha aan waydiinay hantidhawraha waxa weeyi. inii diyaar ma yihiin, oo ma haysataan, oo waasarad kaste iyo hayad walba dakhligeega, iyo kharashaadkeda, iyo waxay wax ku baxayeen bal waxa ku baxayeen, ha inoo danbayso idinka idiin diyaar ma yihiin, oo ma haysataan oo awooda ayaa taa lafteeda dhaqaale u baahane. ma idiin suurta gashay taalaabo, walba oo aad qadaysaan oo kharash ku baxayo inaad foojarkeeda haysaan, habkii iyob documenykeeda.

Taa waxan uga socdaa dhismaha laga dhisaayo laasqoray, ee wasaarad hablaayo dhisatay, ama saylac laga dhisaayo, kharashkii ku baxaayay, ee miisaaniyada ugu jiray, wa saa'ul hadii la sameeyay kharashkii loogu talagalay, ma ku baxay ? Hadii uu ku baxay oo shirkad heblaayo dhistay ma eeg teen, oo hadii waxa ay sheegayeen ku baxeen, dhismahaa labada maqsina daba gal maku samayseen, oo taasi ma idiin suurta gashay? Petrolka iyo martiqaadyada faraha badan, ee had iyo jeer miisaaniyada ku jira, kharashaad kooda, foojaradoodu, petrol hebal lacagta laga qaatay, mar qudha ma eegteen, in 20$ ka ee laga qaatay in ay sidii ahayd u baxday iyo in la iskaga qoray iyo inkale, oo foojarkaasi ma idiin diyaaryahay iyo rasiidkaasi u jeedadu waxa weeyi, oo ma idiin diyaarsab yihiin waxa halkaa ku jira oo dhan, siday u baxeen foojara doodii ma diyaar san yihiin? Waa qodob, mala keenayaa golaha? Mise waa laga qarinayaa golaha? Sidaloola dhaqmaa. Indian aqaanaayoo gaawaadhi tareenlayaala, hadii uu baarlamaanku u baahdo, gaadhi tareenlayaala ayaa la soo qaadayayoo halka la soo gashaa, waxann su, aasha ku soo gabagabaynayaa, cadayn hadii aan u baahano, xaqbaan u leenahay, xaqbaan u leenahay inaan nu soo eegno, xaqbaan u leenahay inaan qaar ka mida eegno, waxan qabaa waa wax fudud, si loosoo baadho, iyo si loo keenaaba, hadii ay u diyaarsan yihiin, waxa lagu qaatay iyo waxa lagu cunay, iyo waxa wax lagu kharash gareeyayba. hadii uu diyaar u yahay hantidhawraha waxan soo jeedinaya, waxan qabaa in aan u sarno guddi, la eegta oo la baadha, oo la soo eegta si aan u qanacno, waxa halkaa ku jiraa inay yihiin, wax dhaba oo soo baxay, oo dabadeed sidii caadada ahaan jirtay aynu duudub gacanta ugu wada taagno. Anigu sidaa uun baan idin odhan laha asalaama calaykum WA raxma (seconded)

**Hantidhawraha guud:** xildhibaan wad mahad santahay, xildhibaan xisaab xidhka waxa soo gudbiyay, labo institution ayaa ka soo shaqeeyay, xisaabiyaha guud, ayaa xisaab xidhka soo diyaariya, waxa joogo dad aqoon leh, oo waayo aragnimo u leh, oo garanaayo

waxan wuxu u soo gudbaa hantidhawrka guud ee qaranka, isaga waxa joogo rag 44years, ama 30 years, intaa oo dhan ka soo shaqaynayay, hanta dhawr oo aqoon u leh, markaa dhaliishaas xafiisku aqoontaas malaha kulama qabno, xaq waxaad u leedahay oo guluhu xaq u lee yahay, in wixii cadayn aad u baaha taan, wax alle wixii aad cadayn u baahataan buuga la iskama soo mid guurin, ee summary ayaa laga soo sameeyay, miisaaniyada foojarada iyo kharashaadkii, ay ku baxeen sub heedh kasta, waxa laga soo min guuriyay, document support kasta ee lagu kharash gareeyay, ama dakhli ha noqoto, ama kharash ha noqotee, ayaa laga soo minguuriyay, oo summeryga laga soo sameeyay, buugan markaa xildhibaan, iyo mudanayasha golaha, iyo gudoomiyaha, wax alle iyo wixii cadayn loo baahdo, xisaab xidhkii iyo documentkii waa la hayaa. Marka hore ayaan idiin horaysiiyay sub hedhyo buugoo dhan hadii su, aal laga qabana, wakhtibuu u baahna yahay, aqoonti iyo xisaabiyhii guud, iyo hantidhawkaba way joogaan, taasina waa diyaar.

7. **Md. Baar Siciid Faarax:** bismilaah raxmaani raxiim, waxan ku waydiinaya hantidhawrka iyo gudida fadhida, waxa ku jira lacag shaqaynaysay in badan oo la yidhaahdo 2% percentga, oo ku magacaaban gobalada bari, inteeda badan waxaan soo maray ilaa 30 magaalo, ama tuulo ama dagmo, ama gobal aha ahaato haba yaratee, wax laga qabtay maan arag, xataa suuli loo dhisay, maan arag ceelal la dhooba qaaday, maan arag lacagtaasi xagay ku baxday, ma meela kale ayaa loo duway, in badana waan waydiinay kuwii kaa horeeyay, waxa ee kolay hadii la badalay nin masuula, siduu sheegay jaamac dee lama badal xafiiskiiba iyo systemkiina, waa shaqaynayay, markaa lacagtaas oo lacag aad u farabadana, halkay gashaa ? Waad salaaman tihiin.

**Hantidhawraha guud:** waan salaamayaa xildhibaanka kaliya, ee haweenay ah ee ku jirta wakiilada, hadaab su, asha u soo noqdo erayga baadhis la yidhaahdo wuxu yeesha, xadi ama scope oo ilaahay uun baa wada garan Kara, illahay uun baa wada garan Kara, wuxuu aadamaha wada qabtay, waa xagii gabayaagiiye waxan leehay rabaw eex ma tiraabee ha igu cadaabin. waxan xildhibaanada u sheegayaa, 2015 wixii ka horeeyay, lacagta loo qabtay gobalada bari, waxay ku jiri jirtay waxa la yidhaahdo miisaaniyada xisaabta ka baxsan, 2015 waxa lagu soo daray miisaaniyada caadiga ah, intii aan anagu ka gaadhnay hawsha baadhide, ee aan ka soo samaynay ma odhan karo, oo xildhibaanada kuma waafaqsanin, waxba laguma qaban, lakiin waxa jira gobalada bari ka soo qaad, coodalaa ka mida waa nu dul tagnay, oo waxa laga qoday riig biyo ah, waxa ka mida garoonka laascaaanood, oo wax laga qabtay waanu tagnay, waxa ka mida goobo ka mida sanaag oo wax laga qabtay, waa suurta gal oo ma odhan karo, sidaeedii ayay wax u baxday, oo wixii loogu tala galay ayay ku baxday, lakiin wax yaabo iyaga oo uu hantidhawraha guud, ee duruufo badan ku gadaaman yihiin xafiiska hantidhawrka guud, oo suurta gal tahay, ama noo suurta galiwayday inaan marno gobalada oo dhan, isagoo golahu ku ansixiyo miisaaniyada oo gaadhayay 100 gaadiida, oo ayna xabad ku lahayn oo hantidhawrku,oo ay ku jirin baabuur, baabuur oo ay iib sadeen ugu danbaysay

2010. waxa ugu danbaysay markay xuukumada madaxwayne silaanyo wadanka qabsatay, yoomanaa hadaa, ma jiro wax gaadiida hantidhawrku iib saday, oo gaadhiya ama miisaaniyada ugu jira, waxa laga yaaba in miisaaniyada, xafiiska hantidhawrka guud inay noqotay, 4,000,000,000 billion 3,000,000,000 sh\sl 1,000,000,000shsl ee soo hadhay, ayaa la rabaa inay gobalada dalkoo dhan lagu soo maro, waxan qabaa in hanti dhawrka in lagu amaano hawsha ay qabteen, waa waajibadka, anaga oo ay naga ahayn in wax inii qarino, ama cid difaacno, waxa nu u taaganahay, awoodayada, hadii aan taageero iniga helno, mudanayaasha sharafta lehna waxan qaban karnaa, wax yaabo faro badan hadii uuna tageero ka helno.

**8. Md. Cumar Cilmi Saleebaan:** marka hore aad iyo aad baan ugu bogaadinayaa, martida sharafta leh ee manta halkan inoogu timid, waxaan kale oo ku bogaadinayaa wax farabadan oo golaha wakiilada hayay, in aad manta wax ka qabataan, waxa jira dhawr iyo toban shirkadood oo wax alle wax shuruuca oo wadanka oo ay ku fadhiyaan, oo aynan jirin inaad ku bilawdeen inaad sharcigooga waydiisaan, oo ay keenaan anagu waxanahay gudida dhaqaalaha, waxanu nu tagnay berbera illaha dhaqaalahaan nu soo eegnaa, sanadkiiba mar haamihii shidaalka oo uu baarlamaanku diiday, inay ansixiyaaan way noo diideen inaan nu galno laabkii soo eegno, way noo diideen inaan gudeheega galno, askarbaa la na horkeenay iyo ciidamo waad arkaysaa xaga ay sharci daraantu marayso, sharcina kuma fadhiyaanoo baarlmaankiiba diiday kaa waa inigu bogadinayaa, waxa ka midoo kale in la leeyahay petrolba la qoraayaa oo waa la baadhayaa. Distoorka qodobka 55 aad wuxuu qorayaa taasi waa mid wanaagsan oo aad bilawdeen waana idinku bogadinayaa insha allaah, waxa inii rajaynayaa inaad sii joogtaan hantidhawre. baarlamanku qof lama xisaabtamo, waxa uu la xisab tama nidaam, waxa ay su,aalaha runtii ay ula jeedeena ee ay waydiinayaan nidaamka lagu shaqeeyaa sax ma yahay mise maaha, maxaa ka qaldan, halkee nu ka hagaajinaa, waayo sanad walba haday timaado xisaab xidh ama miisaaniyad aan lahayn wax background ah, anagu sanadkan waan u guntanay miisaaniyada, sanadkan siyaasadeedii guud waxana nu filaynaa inay wanaagsanaato markaa waxa weeyi nidaamka xisaab xidhka ama nidaamka daba galka hantida qaranka ma u dhigteen nidaam. Idinku hadii aad tihiin hantidhawrkii, nidaam yaala xeerku waa inoo cadeeyo ee inoo qoray, lakiin nidaamkii hab ha u raacdaan mad u samaysateen, anaguna aan idinkula shaqayno oo aan idinka war hayno.

**Hantidhawrka guud:** runtii afarta bilood ee aan meesha joogay, waxa aanu samaynay, waxaa Weeyi maamul daadajin, anagoo samaynay waaxda maamulka dawladaha hoose oo aan u samaynaa waaxda ugaaraa hantideeda iyo xafiisyadeeda, waaxda dawlada dhexe oo leh xilkooda iyo xafiisyadoda agabka ay ku shaqeeyaan lakiin laptono ay iyaga iska leeyihiin, waxan filaynaa computerka ay xafiisyadu iska lee yihiin, waaxda haayadaha madax banaan, sida wakaaladaha biyaha, dakada, iwmd oo iyaguna tiim koodii iyo xafiisyadoodii leh, waxaan kale oo diyaar garaynay, barnaamijka aan ku shaqayn doono sanadka 2018, xisaab xidhkii sanadka la soo duubi jiray, quarter quarter

baa loo bixiyaa misaaniyada, inay wasaaradaha iyo haayadaha qaranku u soo xidhaan bileh, bisha febaury 10 2018 inay haayda walba iyo wasaarad kasta soo xidho bishii hore, si ay sahlanaato u na sugnaato miisaaniyadu, siday u baxayso iyo meesha ay ku baxayso, sanadka bisha labad quaterkaasi haduuna xidhminapril 10keeda, quaterka hore quatarka kale inaaana la siidaynanayn, oo aanan sidayn ilaa quaterkaasi bilbil u soo xidhmo. xisaab xidhkuna waxa uu ku wanaagsan yahay, hadii la yidhahdo sanadkiiba mar la xisabtamaya, waxa ka wanaagsan sanadku waa 12bilood, 12 xisaab xidh inay ka yimadaan. Wakaaladaha iyo wasaaradahaba iyo dhamaan haayadaha qaranka inay nidaam yeesshaan, oo anay noqon sanadkiiba mar xisaab xidh la samaynayaa. Roundam kii baa baadhitaan loo samaynaya, iyadoo shaqii kalana socoto, waxaanu u samaynay nidaam nuucaasa, markaa sharcigu isagu waa qoran yahay lakiin nidaamkiina sidaa ayaan ka dhignay.

**9. Md. Maxamed Yuusuf Waabeeye**: waad mahad santahay gudoomiye, waxaan hantidhawraha anigu waydiinayaa, labo su'aalod marka hore waxa jira Matalan, markay foojar qorayso madaxtooyadu oo acountkii ay u diaraysay madhan yahay, inay isticmaasho acounka sida kaa aafadoo kale ee laga soo sheekeeyay, waxaan hadii meeshii school laga dhisayay meel galbeed ba ah in la yidhaahdo uga saara aafada uga saara, 2% percentga lacagtaasi maxaa hanti-dhawr ahaan iniiga yaalla? Hantidhawre guud ayaan dhawayd waxa aad u yeedhay, shirkadaha privateka ah ee heshiisyadii ay kula jireen, waxayna heshiis yaaasi la hayeen line ministers, hore markaa inay wasaaradihii heshiiska galay, aad wasaaradihii ka qaadato miyay wasaaradihii kuu diideen, ay la galeen shirkadahaa waayo adigu toos baad ugu xilsaaran tahay, inaad la xisaabtanto xoolaha dawlada, markaa tooskaa aad u dhaaftay ma waasaradihii baa diiday inay heshiiskii keenaan? Ta sedexaadna xisabiyha guud door wayn buu ku lee yahay xisaab xidhka, waa sidee wada shaqayntiinu iniga dhexexaysa hanta dhawraha guud iyo xisaabiyaha guud?

**Hantidhawraha guud:** ta qoon daynta miisaaniyada iyo qaabkay u qoondaysan tahay, waxa alaa wixii horu marina ama caafimaad ugu jira, wax walba oo horumnarina waxanu jecelnahay, inay sida loogu talagalay ama loo qoondeeyay u baxaan, lakiin midani anagu waynaga horaysay iyo qaabkii loo isticmalay, su,aashaa mustaqbalka ee waydiiseen waxan rajaynayaa inay ay sidii loogu tala galay u baxaan, dee balan qaadka madaxwaynaha na ka mid bay ahayd, oo markaas waa wajiibad umadu ku leedahay ee ina wada saaraan dhamaan teen. Markaan anagu qaybtaan ku leenahay iyo masuuliyada, inaga dhexayso qaybta aan ku leenahay waxan isku dayaynaa inad sideeda u fusho. Arinta shirkadaha aan u yeedhnay ee kula jira heshiiska wasaaradaha oo dhan waa yaala, heshiisku copyyadana waanu wada helaynaa, lakiin u jeeda aan uga dan leenahay waa inaan nu helno shirkadahan, inan nu helno contact information kooda, inaan nu helno xafiis yadooda inaan nu helno meelaha loogu hagaagayo dhamaan tood, iyo inaan nu barano intaba.

**10. Md. Maxamed Faarax Qabile** aad iyo aad baa lagu mahad naqayaa hantidhawraha guud, iyo dhamaan shaqaalihiisa, iyo Golaha Wakiilada, waayo xubinta waa xubin distooriya, oo ku xusan distoorka qaranka, anigu su, aashaydu waa mid weeyaane waxa weeyaan waxa nu nahay umad distoor leh, ayay nu ka mid nahay xafiiska hantidhawrka guud waxan qabaa inuu yahay tirarka ugu waa way nee qaranka. Laga daawan karo, waxan danaynayaa in miisaaniyadaha iyo xisaab xidhyada, oo is iskudheelitirnaan iyo islaxisaabtanka cad yahay. Meesha uu galayso in dadku barto, oo garto waa xafiis qiimo badan ugu fadhiyo umada anagu su, aalahan aan ku waydinayno, qiimo wayn bay ugu fadhidaa umada dhawritaanka iyo isla xisaabtanka xafiiska ama distoorka dee door wayn bay ku leedahay. Sida uu dhigaya qodobka 55aad waa kala xoog badan yahay, farqadisa 6aad, waxay mudane waa jibinaysaa soo bandhigida xisaab xidhka, sanad miisaaniyadedka walba oo dhamaada mudo aan ka badnayn 6bilood.

Taariikhda sanad maaliyadeedka, iyaga oo ay golahani in ay waajib kaga dhigay, inay ka doodaan kana soo saaraan goaan cad, xisaab xidhkii iyo siduu u dhacay laba wax bay xanbaarsan tahay taasi, hadii ayna xisaab xidhkaasi ayna la socon support document, siday xildhibaanadii iga horeeyeen sheegeen anay lahayn ma noqonaynayso in si sharciya loo qato,dhaliishiisuu laha maxaa kaga diideen ama ku adkaato xafiiska hantidhawraha guud, inuu yidhaahdo xafiiska hantidhawraha guud support document ma keeni karo, ku waa soo wixii inoo muujin lahaa cadaymaha iyo xisaabta kale.

Haday noqoto dhinac kharashka iyo oo ah bixintaba, iyo cadaymahoogi iyo siday u baxayeen, iyo meshay ku baxayeen, iyo muda ay ku baxeen, hadii ay ka badatoo 6 bilood manta halkan waxa nu joogaan 2017 aakhirkiisii. Anagu cidaan la hadlaynaa sidaa uu sheegay xildhibaan cumar sanwayne, waa xafiiska iyo waajibadkii u qaranka u hayay, sida daraadeed manta waxa document la soo kordhiyay December 2017. halkii uu xafiisku ka soo gudbin laaha 6bilood ee ugu horaysay 2017, waa distoor jabin cad oo loo dhimay distoorka ma badheedhbaa in hantidhawrku su, aalahana maaha in ay jawaabtoodu badato horaa loo jabay, suurta gal maaha waxan halkan adoo nuu kalas kaagii wata iyo dictionarygii xafiiskaaga, iyo raga qubaradee aad amanaysay ee mudaa 30 sano ah soo shaqaynayay, miya loo badheedhay in golahan lo horkeeno xili aan distoorkii iyo wixii uu waajibinayay in goor xun socod lala yimaado. xiligan taasi sina cudur daar ku noqon mayso, siday u noqonaysaa hantidhawraha cusub ee xilkan imika sii hayo, ama ku sime ha ahaado, ama kii rasmiga ha ahaado, ee xafiiska ma ka furanaysaa ceebtaasi, khubaraadisi 30 sano leh waayo aragnimada iyo inay imika ka caawinaysan hantidhawraha guud, oo ay jaawaabaha bixiyaan, miyaa xafiisku u badheedhay muxuu u haystay miyayna ahayn khalad. Suasha labaad ee aan waydiinayo hantidhawraha guud, mudada aad joogtay xafiiska mudane ma jiraan, wax gaadiida oo aad iibi seen, oo idinku sii gadeen oo uu lahaa xafiiska hantidhawrka guud, hadii ay jawaabtu tahay haa, ma lamariyay dariqii saxda ahaa ee qandaraas yada, halkeese lacagtoodii lagu shubay.

**Hantidhawrka guud:** xildhibaanku aad buu u mahad san yahay, wuxu na waydiiyay labo sualood, hadaan kala qaad no mida hore qodabada dastuuriga ah, sida uu dhigaayo ee uu tilmaam waxana ugu lamaanaynayaa ama aan ugu darayaa qodobka 33aad, ee xeerkan xafiiska hantidhawraha guud ee qaranku, wuxuu qeexayaa in xisaab xidhkste, oo miisaaniyadeed dhamaadka sanadka ugu danbayn bisha4aad uu xisaabiyaha guud u soo gudbiyo, hantidhawraha guud, siduu hantidhawraha guud u raaciyo waxa informationa uu hayo, ee saxahaaneed ee xisaab xidhkaa loo soo diray, xili aan ka badnayn 30bisha 6 sii uu uga soo gudbiya golaha wakiilada, xildhibaan waxa cadaynayaa 30 bisha 6 ama wakhtigii dastuurku nafarayay in ayna ka danbayn ee loo soo gudbiyay xisaab xidhkaa, waxa jira sanadaha qaar cudu daaro macquulihi ay yimadeen oo ay golayaashu fasax ku maqnaayeen, ama hawshaa baaxada leh ee ah in aan labo bilood gudohood, anagu ku soo samayno aragtida sax ahaaneed ee xisab xidhka miisaaniyada, halka xisaabiyaha guud uu gacanta ku hayo isagu oo joogto u haya, uu afar bilood haysto, kaasoo oo wakhtiyada qaar ay dhici jirtay in anagu fasax uga qaadano, hadii ay dhacdo inaan cudur daar u soo gudbino shirgudoonka ,oo la naga ogolaado manay dhicin mar kaliya isaga oo aan ogalasho nu ka helin shirgudoonka, ama golaha inaynu ka danbayno xiligii sharcigu baneeyay.

Hadii aan su'aasha labaad u soo noqdo ee ahayd khabiiraad haysataa documentka ma keenayno macquul maaha, sida uu xeer kani dhigaayo qarankeenu wax uu lee yahay sida uu baabuurku u lee yahay baanado lagu fur furo, kaa qarin mayno oo xaaran bay naga tahay, inan kaa qarino difacina mayno, qof inta aan nu ka difaacno qarankan oo, qaranka dulmino, maaha waajibaadka nasaaran allah khaaliqa ah baa na arkaaya, ayaa taa mana aha xisaabina way danbaysaa, run ahaanshahan xisaabtan sida uu dhiga qodobka 32aad, ee xeerka xafiiska hantidhawraha guud ee faafintiisa rasmiga ah la sameeyay 2017.

Xildhibaan sidaad ka war haysaan, xiligaa sida aad ka war haysaan mudanayaal xeeka xafiiska hantidhawrka guud wuxuu ahaa mid yar wixii ka horeeyay 2017, waxa la odhan jiray xeer number 5, waxana waxanaka koobna dhawr iyo toban xaashiyood muu gaadhsiisnayn muu lahayn waxa ku xidhnaa xafiiska dabara badan oo aanu u lahayn awoodo uu waxaasi ku qabto, lakiin cadaalada iyo dadaal kayaga, iyo dadnimadaya, iyo daacadnimadayada waxay ku soo bixi doontaa 2017. ,markaan nu xeerkan dabaqno aad idinku dajiseen, wixii ka horeeyay xerkan, anigoo hore uga hadlay duruufaha ku gadaamnaa xafiiska, waxa u dheeraa xeerka oo awood badan u siinayn, in masuul kasta iyo goob kasta lagu soo qabta, lakiin 2017 miisaaniyada waxa nuu balan qaadaynaa, tii aan laga tagayn wixii horana sida qodobka 32aad ee xeerkani dhigaayo, wixii ka soo baxay miisaaniyada ama qoraal ama faldanbiyeed ka yimid inaan, u gudbino haayadaha ku shuqul leh, ama shaqada cidii ku xad gudubta ama ku xidhan, 2017 waxa ku sii gudban in dad waynuhu ka soo qayb galayan, oo aan tusayno wixi aaan qabanay oo shilinkastaa xaguu maray, waad mahad santihiin .

**Hantidhawraha guud:** Waan salaamayaa Guddoomiyaha, iyo Xildhibaanadaba, su'aashaada hore xisaab xidhka miisaaniyada, samaynta miisaaniyada ama qorshaha miisaaniyada ee sanadka soo socda, waxa loo soo gudbiyaa Golaha Baarlamanka ee wakiilada, waxa loo soo gudbiyaa buug oo ay ku qoran tahay ku tala galka, iyo horumarka loogu tala galay miisaaniyada qaranka, buugani wax uu ka kooban yahay, marka la leeyahay aqoon buu ka madhan yahay, dee aqoonta uu ka madhan yahay ma garanayo anigu, buuga marka la soo gudbiyo xisaab xidhka, miisaaniyada qaranka ee qaybta ku shaqada lihi soo eego ee golaha loo soo gudbiyo sidan maanto kale, waxay ahayd goluhu inuu ama soo akhriyo wax alaale wixii kuweeri saran yahay ee la soo naaqishay, in sidan oo kale goluhu uga dooddo.

Goluhu isagoo summerya inta ay mad madaw ku jiro ay la soo xidhiidhaan hanta dhawrka guud, oo yidhaahdan waxaynu u bahnanahay document support, sub heedhada nucaa iyo nuucaaya, oo madmadaw nagaga jiro, markaasaa la soo qaadi karaa document support, waxa ka maqan buugan miisaaniyadii qaran oo dhan waa document support oo kaliya, ina la na yidhaahdo meelahaa ayuu madmadaw saran yahay, oo goluhu nasoo gaadhsiiyo, waxa nu u baahanahay heedhadhka sidaa iyo sidaaya, ayaanu u baahanahay document support, iyo wixii aad ku cadaynaysiin, madaa uu document ku support uu yahay wixii kuweeri ku jiro golaha, oo ama sigaaraba la iniiga soo gudbiyay, oo aad naaqishtaan.

Markaa waxa jira hab ama system aad wax ku ansixisaan, oo aad ku ansixisan jirteen, oo uu goluhu ku shaqaynayay kolay wax ka duwaan oon soo gudbinaynay ma jirto, lakiin waxa aanu balan qaadaynaa su'asha shuruucda iyo xeerarka miisaaniyada qaranka, wuu ku shaqaynayay taa waa nu ku shaqaynaynaa, oo waa wajib in ay cid walba ku shaqayso, tirikoobka hantida ma guurtada ah, iyo guurtada ah ee qaranku leeyahay, ma inii diwaan ganashatahay. anigu waxan ku soo biray xafiiska hantidhawrka guud ee qaranka 5 august 2017, markaan kusoo biiray xafiiska anigu diiwaan hanta guurto iyo ma guurto ah mid na ma oo lin, lakiin waxan samaynay inaanu samayno diiwaanka hantida guurta, inan ka bilawno oo gadiidka aan ka bialwno, waxan kaloo samaynay oo diwan u samayno, diiwanka guurtada ah iyo ma guurtada ah waan samaynaa inshaalaah hadii ilahay ka dhigo waana la helayaa. Sida hantidhawraha guud sheegay, waa run in hada bilaw ay tahay in aanu samayno diwaan hantida ma guurtada ah.

Golaha waxaan lee yahay mid baan balan qaadayaaye, idinkuna mid balan qaada, waxan balan qaadayaa inaan gudano, samayno diiwaanka hantida ma guurtada ah lakiin xildhibaanku ha balan qaado.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |